

# Goobta Baarista ee COVID-19 oo Bilaash ah ayaa Hadda Furan

## Highline College

2402 S. 240th St, South Parking Lot  
Des Moines, WA 98198

- Looma eegayo sharciga socdaalka ee uu qofku haysto
- Turjubaanka luuqadaha waa laga helayaa goobta
- Ceymis looma baahna, lakiin soo qaado haddii aad heysatid
- Waxa la doorbidayaa in aad hore isu diwaan geliso, lakiin haddii aad iska timaadid goobta, baritaanka waad heleysaa

## Goobtu waxa ay furan tahay Isniin - Sabti, 9:30 a.m. - 5:30 p.m.

Dadka goobta iska yimaada teendhada ayaa lagu baadhayaa. Goobta gawaadhida la dhiganayaa waa bilaash, sidoo kale waxaa la heli karaa marinka khadka baska lambar 156.

Baahida oo sareysa awgeed, iska diiwaangeli khadka tooska ah ee ku qoran (Af-Ingiriisiga) [chifranciscan.org/freetesting](https://chifranciscan.org/freetesting) ama wac Xarunta Degmada ee 'COVID-19 Call' Xarunta (maalin kasta 8:00 AM - 7:00 PM, turjubaanno ayaa diyaar ah): 206-477-3977



- Miyaad leedahay qufac, qandho, jir xanuun, dhadhanka ama urta oo kaa lunta, ama calaamado kale oo coronavirus ah? Miyaad la kulantay qof qaba COVID-19 labadii toddobaad ee la soo dhaafay? Isla markiiba baadhitaan samee.
- Natiijooyinkaaga baaritaanka waxaa lagu heli doonaa 48 saacadood gudahood.
- Su'aalo haddii aad qabtid? Kala xiriir Xarunta Wicitaanka COVID-19 ee Caafimaadka Dadweynaha King County (206) 477-3977, maalin kasta laga bilaabo 8:00 AM - 7:00 PM. Turjubaanno ayaa diyaar ah haddii aad u baahan tahay caawimaad xagga luqadda ah.